

Caawimaada Shaqo La'aanta marka Masiibo dhacdo

Degmooyinka: Androscoggin, Kennebec, Oxford, Somerset, iyo Franklin

TAARIKHDA SAAMAYNTA: Diisambar 17, 2023, illaa Diisambar 21, 2023

WAA MAXAY CAAWIMAADA SHAQO LA'AANTA EE MARKA MASIIBO DHACDO (DUA)?

Caawimaada Shaqo La'aanta marka Masiibo dhacdo (DUA) ayaa gunnooyin ku meel gaar ah siisa shaqsiyaadka shaqadooda ama ganacsigooda luliya ama ka istaagay sabab si toos ah ula xiriirta masiibo wayn aanana xaq u ahayn caymiska caadiga ah ee shaqo la'aanta (UI).

YAA U QALMA?

Shaqsiyaadka lumiya shaqooyinkooda sabab toos ula xiriirta masiibada wayn, ee:

- Ahaa kuwo iskood u shaqaysta aysana u suuro geli karin inay adeegyadaas baxshaan;
- Aan awoodin inay tagaan shaqadooda;
- Loo mudeeyay kadibna ay u suuro geli wayday inay bilaabaan shaqo ama shaqo iskood ah oo ka jirtay aaga masiibada;
- Awoodi waayay inay shaqeeyaan sabab la xiriirta dhaawac ka dhashay si toos ah masiibada, ama;
- Noqday madaxa qoyska sabab la xiriirta geeri ka dhalatay masiibada.

LACAG INTEE DHAN AYAAN KU HELI KARAA GUNNOOYINKA DUA?

Cadadka gunnada asbuuc kasta gudaha Maine ayaa u dhexaysa \$220 ilaa \$573. Cadadka qofku u qalmo inuu helo ayaa lagu saleeyaa mushaaraadka uu helo marka uu shaqeynaayo.

MA JIRAA ASBUUCA SUGITAANKA EE GUNNOYINKA DUA?

Maya.

MAXAAN U BAAHAN NAHAY INAAN SAMEEYO KADIB MARKA AAN CODSADO SI AAN UGU SII QALMO?

- Soo Gudbida codisyada asbuuc kasta.
- Waa inaad diyaar u tahay inaad shaqayso.
- Si joogto ah u raadi shaqo.
- Ha diidin shaqooyinka kugu haboon ee laguu soo bandhigo.

SIDEE AYAAN U CODSANAYAA GUNNOOYINKA DUA?

Oonlaynka barta <https://reemployme.maine.gov/>

Taleefanka ka wac 1-800-593-7660

TTY/Relay ee dadka Dhagoolka ah iyo kuwa maqalkoodu culus yahay: Maine relay 711